UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta xaaladda # 48 – 5 Desembar, 2008

Is-beddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Codsiga gargaarka bani'aadamnimada ee Soomaaliya ee sanadka 2009ka ayaa 1dii Disembar 2008 Nayroobi laga soo saarey isaga lagu doonayo lacag xoogaa ka badan US$918 milyan oo lagu taageerayo ilaa 200 mashruuc oo ay soo diyaariyeen 14 Hay'adood oo Qaramada Midoobey ah, 32 NGO caalami ah iyo 39 NGO degaanka ah. Kororka xaddiga iyo maaliyadda ee codsiga Soomaaliya uu ka kordhay US662 milyan oo uu ahaa sanadkii 2008 iyo US$918 milyan oo uu sanadka 2009 yahay ma muujinayo oo keliya tirada aadka u badatey ee dadka gargaarka u baahan (3.2 milyan oo qof) ee waxa ay muujineysaa kororka saa'idka ah ee uu kordheen qiimaha badeecooyinka iyo kharashka lagu gaarsiinayo Soomaaliya.

"Waxa ina hor yaalla maanta waa xaalad ay kalabar dadku ay haysto dhibaatooyin amaba ay u baahan yihiin gargaar. Shaki kuma jiro in dhibaatooyinka ay gaareen heer weyn oo aan la dafiri karin," ayuu yiri Isku-duwaha iyo Madaxa Qaramada Midoobey ee Dalka, Mr. Mark Bowden. "Su'aali kama taagna in sanadkii 2008, hawlgallada bani'aadamnimadu ay la rafaadayeen wax ka qabashada dhibaatooyinka sii ballaaranayey iyo tirada dadka nugul oo ku sii badaneyey degaan fursadaha gargaarka bani'aadamnimada ee la haysto ay sii yaraanayeen. Haseyeeshee guud ahaan waxa ay ku guuleysteen – helidda wixii loo baahnaa, geynta halkii looga baahnaa iyo waqtigii loo baahnaa. Ka sokow waxqabad wadajira oo ku aaddan caafimaadka, nafaqeynta, biyaha iyo fayadhowrka oo laga lahaa ujeeddooyin degdeg loogu badbaadinayo nafaha, taageerada nolol-raadsiga oo barbar-socota ayaa iyana si degdeg ah loogu baahan yahay si looga hortago in qoysasku ay ku dhacaan saboolnimo aan laga soo kaban karin iyada oo la eegayo cuntada oo qaali noqotey, burburka hantida iyo helid la'aanta cuntada. Waa aan awoodnaa, ee waa in aan arrintaan sameynaa sanadka 2009."

Codsiga bani'aadamnimada ee Soomaaliya ayaa ilaa 4dii Disembar 2008 heley 70% maaliyaddii uu u baahnaa. Haseyeeshee, waxaa jirta in waaxaha ay ku kala duwan yihiin heerarka miisaaniyadaha ay heleen. Qaar ka mid ah waaxaha ugu muhiimsan sida bed-qabka & nabadgelyada shaqaalaha ayaa heley (8%), beeraha iyo nolol-raadsiga (24%), caafimaadka (40%), waxbarashada (42%) iyo ilaalinta xuquuqda (42%).

Sahankii ugu dambeeyey ee Waaxda Qaramada Midoobey ee Lafaguridda Haqab-beelka Cuntada (FSAU) ay sameysey bilihii Oktoobar iyo Nofembar ayaa xaqiijiyey sii jiritaanka dhibaatooyinka bani'aadamnimada, iyo in gaar ahaan ay ka jiraan bartamaha Soomaaliya halkaas oo qaar ka mid ah heerarka nafaqo-xumada ba'ani ay ku dhow yihiin 6% marka la barbardhigo 3% oo ay ahayd bishii Maajo 2008. Heerka ugu xun ee la qaadan karo waqtiyada ay jiraan xaaladaha degdegga ahi waa 4%. FSAU waxa ay bidhaamisey baahida degdegga ah ee loo qabo waxqabadyada nolol-raadsiga iyo kuwa bani'aadamnimada ee lagu badbaadinayo nafaha iyo nolol-raadsiga.

WFP ayaa ku soo warantey in 1,250 mt oo cunto gargaar ah oo saaran 41 baabuur ay ka gudbeen xuduudda Kenya iyo Soomaaliya ayna u gudbeen gobollada Gedo, Jubbada Hoose iyo Jubbada Dhexe ee Soomaaliya iyaga oo kala marey Mandheera iyo Libooye ka dib markii xuduudda la furey 28kii Nofembar. Dowladda Kenya ayaa ka xirtey xuduudda xitaa in ay maraan xamuulka gargaarka taasna waxa ay ka dhalatey welwelka dhinaca nabadgelyada ka dib markii Ceel-waaq oo Waqooyiga Kenya ku taalla lagu af-duubey laba sooro 10kii Nofembar. Cuntada gargaarka bani'aadamnimada ee ka gudubta xuduudda ee gaarta Koonfurta Soomaaliya ayaa ay dhibaato soo gaartey, taas oo keentey in cuntadii loogu talagaley in la qaybiyo bisha Nofembar ay hoos u dhacdo.

30kii Nofembar, markab sidey 11,000 mt oo masaggo, galley iyo Soya isku shiidan iyo saliidda cuntada lagu karsado ayaa nabad-qab ku gaarey dekadda Berbera, Soomaaliland. Markabka ayaa ka shiraacdey Mombasa, 10 maalmood ayuu ku jirey biyaha badda Soomaaliya ee ay ka buuxaan burcad-badeedda isaga oo ay gelbinayaan ciidmada badda ee NATO. Kani waa markabkii ugu horreeyey ee u kala socdaala Mombasa ilaa Berbera waqtiyadii dhowaa. Badi maraakiibta dekadaha Berbera iyo Boosaaso ku socdaa waxa ay ka soo baxaan Jabuuti.

Waxqabadka
Toddobaadka laga warbixinayo gudihiisa, WFP waxa ay dirtey 1,366 mt oo cunto kala duwan ah taas oo lagu beegsanayo 368,322 ka faa'iideyste oo ku nool Waqooyiga Bari iyo Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.

WFP waxa ay qorsheynaysaa in bisha Disembar ay 27,630 mt oo cunto ah ay Soomaaliya oo dhan ugu qaybiso 1.6 milyan oo Soomaali ah. Ka-faa'iideystayaasha bishaas waxaa ka mid ah 260,860 Soomaali nugul ah oo loo beegsadey iyaga oo qayb ka ah barnaamij taageeridda bulshada ah (ayna ka mid tahay waxqabadyo nafaqeyn), 656,980 dadka gudaha ku barakacay ah iyo 420,280 Soomaali nugul ah oo lagu beegsadey cunto qaybinta guud iyo sidoo kale 111,900 ka-faa'iideyste oo iyana lagu beegsadey Cunto-shaqiyo iyo tababar ku beddeleshada. Nabadgelyo-xumida ka jirto qaybo Soomaaliya ka mid ah ayaa ah culayska ugu weyn ee laga yaabo in uu saameyn ku yeesho qorshaha cunto-qaybinta ee bisha Disembar.

Faahfaahin dheeri ah oo Af-Soomaali ama Ingiriisi ah kala soo xiriir: Muna Mohamed on + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org
Website address: http://ochaonline.un.org/somalia